

Xagee laga helaa buugta luqadaha kale ku qoran?

The Millennium Library
(Maktabada Millenium)
251 Donald Street
Winnipeg, Manitoba, R3C 3P5
Phone: 204-986-6432



Hadii ay cunugaaga ku adagtahay fahmida iyo kuhadalka luqadaada iyo ingiriisiga, waxa ay u baahan karaan in ay caawimo ka helaan qof ku takhasusay cilmiga barashada cudurada ee laxiriira kuhadalka luqada. Kalahadal macalinka fasalkaaga.

Adeegyada Muhaajiriinta:

Immigrant Women`s Association of Manitoba, Inc
(Ururka Haweenka Muhaajiriinta ah ee Manitoba)
University of Winnipeg Library
(Maktabada Jaamacada Winnipeg)
4th floor- 515 Portage Avenue
Winnipeg, Mb. R3B 2E9
Tel: 989 5800

Immigrant Centre Manitoba
100 Adelaide Street
Winnipeg, MB R3A 0W2
Tel:943 9158

Adeegyada Qaxootiga:

Manitoba Interfaith Immigration Council
(Golaha Iskaashiga diimaha laanta socdaalka ee Manitoba)
Welcome Place (Goobta Soodhoweynta)
397 Carlton Street
Winnipeg, Mb. R3B 2K9
Tel: 977 1000

Needs Centre for War Affected Families
(Xarunta Rabitaanka ee Qoysaska Dagaaladu ay Saameeyeen)
251 A Notre Dame Avenue
Winnipeg, Mb. R3B 1N8
Tel: 940 1260

Community Health Clinic:

(Xarunta bukaan socodka Caafimaadka ee Bulshada)

Mount Carmel Clinic
886 Main Street
Winnipeg, MB. R2W 5L4
Tel: 582 2311

LUQAD KALE MA KU HADASHAA GURIGA?

Somali



WINNIPEG SCHOOL DIVISION
Child Guidance Clinic

(Qaybta Iskuulada ee Winnipeg)
(Xarunta bukaan socodka Hanuuninta ilmaha)

SU'AALAHHA BADANAABA LA ISWEYDIIYO:

1. Ingriisigu ma aha luqadeenii koobaad. Ma waxa aan u baahanahay in aan ingiriisi Kula hadalno caruurteena?

Maya. Caruurtaada kula hadal luqada Aad ka kuugu fudud. Caruurta waxa ay u baahan yihiin in ay guriga gudhiisa ka maqlaan luqad nadaam wanaagsan.

2. Caruurteenu miyaysan si degdeg ah ubaran doonin ingiriisiga hadii aan guriga kula hadalno af ingiriisi?

Muhiim maaha. Sida ay cunugaaga xirfadiisu ugu adag tahay luqadooda koobaad, ayay sida ugu degdega badan ugu baran doonaan luqada cusub (ingiriisi).

3. Odaygayga iyo anigu luqado kala duwan baan ku kala hadalnaa. Luqadee ayaan kula hadalnaa caruurteena?

Qofkasta oo hadlayaa waa in uu kula hadlaa luqada u fudud markii ay hadlayaan. Tani macnaheedu waa hooyadu waa in ay kula hadashaa cunuga hal luqad aabuhuna waa in uu kula hadlaa luqad kale.

4. Miyaysan barashada laba luqadood jaahwareer ku noqonayn caruurtaada?

Maya. Caruurta aduunka oodhan waxa ay bartaan in kabadan hal luqad. Kuhadalka in kabadan hal luqad waa faa'iido.

5. Caruurtaadu ma doonayaan in ay ku hadlaan luqadeena guriga marka la joogo. Maxaan samaynaa?

Waa in aad siiwadaa in aad kula hadasho luqadaada koobaad xataa hadii ay caruurta doortaan in ay ku hadlaan ingiriisi.

6. Maxaan usii wadaynaa in aan ku hadalno luqadeena koobaad hadii aan hada ku noolnahay Canada/Winnipeg?

Luqadu waa mid ka mid ah kuwa sida adag isugu xira dhaqankaaga iyo hideha. In aad siiwado ku hadalka luqadaada hooyo waxa ay ka caawinaysaa caruurtaada in ay bartaan taariikhda iyo dhaqanka ayna sii wadaan xiriirkooda ay la leeyihiin dadka ka waaweeyn ee qoyska ka mid ah.

7. Maxaan samayn karaa si aan uga caawiyo cunugaaga sidii uu uga horumari lahaa luqadeena koobaad guriga marka la joogo?

- Lahadal cunugaaga
- Wax u akhri cunugaaga maalin kasta
- Ku dhiiri-geli cunugaaga in uu kuu sheego sheekooyin ku saabsan sawirada buugta ku qoran
- Cunugaaga u qaad meelaha kalana hadal waxa aad aragto
- Usheeg sheekooyin ku saabsan qoyska
- Isticmaal erayo cusub, badanaaba aad u isticmaal.
- Ka daba dheh jumladaha cunugaaga in yar oo sheeko ah na ku dar
- Fiiri cunugaaga marka aad la hadlayso
- Ka hadal waxa uu cunugaagu samaynayo
- Ka hadal waxa aad samaynayo
- Dhegeyso muusikada; wadajir u wada heesa

